

## SANDUUQA ISKA QAADIDDA TIJAABADA HPV


Sanduugan waxaa ku jira agabyada loo baahan yahay si uu qofka isaga-qaado.

### Macluumaadka muhiimka ah


- Fadlan si taxadar leh oo buuxda uu akhriso tilmaamahan ka hor inta aaddan isku dayin in aad iska qaado muunadaada.
- Haddii aad raacdo tilmaamaha waxaad daremi doontaa oo keliya wax yar oo xanuun ah amaba waxaa dhici kartaa in wax xanuun ah aaddanba dareemin.
- Muunadaha waa in aan la iska qaadin: xilliga caadada (marka ay caadada kugu dhacdo), xilliga aad uurka tahay, saddexda billood ee ugu horreeya kaddib marka aad dhasho, haddii dhawaan laguugu sameeyay qalliin dhanka cudurrada ku dhaca haweenka, amaba haddii aad isku aragto dhiig bax aan caadi ahayn amaba haddii aad xanuun ka dareemayso dhanka miskaha.
- Muunadaha waa in aan la iska qaadin haddii aad isticmaashay tuubooyinka xubinka taranka la geliyo ee daawooyinka qaada, kareemo ama walxaha lagu dhaqo, daawooyinka ka hortaga uurka amaba koondhom 3 maalin ka hor inta aan la iska qaadin muunadaha.
- Muunadaha waa in aan la iska qaadin haddii aad sameysay galmu, aad martay raajada lagu ogaanaayo xalka ilmaha aad uurka ku sido amaba baaritaannada cudurrada ku dhaca haweenka 2 maalin ka hor inta uusan qofka iska qaadin muunadaha.
- Haddii ay jiraan dhibaatooyin, dareemayso caajis/madaxwareer oo aad cabsanayso inaad suuxdo, fadlan jooji oo la tasho xirfadlaha ku siiyo daryeelka caafimaad.
- Suufka la isaga qaado muunadaha ma ka sameeyso agab asal ahaan ka yimid xoolaha.

### Waxa uu ka sameeysan yahay suufka muunadaha la isaga qaado

Fadlan eeg in sanduuqa ay ku jiraan dhamaan waxyaabaha hoos ku xusan. Ha u sii gudbin iska qaadidda muunadaha haddii uu sanduuqa ka maqan yahay hal sheey ama sheey waxyeello gaartay, la xirii xirfadlaha ku siiyo daryeelka caafimaad si uu ku cawiyo.



### Suufka la isaga qaado dhacaanka xubinka taranka iyo tuubada lagu rido




### Baqshada lagu diro muunadaha

### TILMAAMAHA LOOGU TALLAGALAY QOFKA BUKAANKA AH – SUUFKA MUUNADA

**1** Ku mayro gacmahaaga biyo saabuun leh oo qandac ah. Fur sanquuqa uu ku jiro suufka iyo tuubada lagu rido.

Ka fur furka tuubada lagu rido muunadaha oo iska dhig dhinac.



**2** Waa muhiim inaad marba dhinac uu dhaqaagin xilliga aad qaadeyso muunadaha. Waxaad qaadi kartaa muunadahaaga adigoo taagan. Wareeji furka uu ku jiro tuubada suufka si aad uu fujiiso waxa lagu alxaamay ka hor inta aadan iska qaadin muunadahaaga.




**3**

Ka soo saar suufka gasaca oo ku qabo farahaaga halka ay calaamada casaanka ah ku aaddan tahay ee bartamaha qoriga si aad isaga qaado muunadaada.


**Ha ku qabanin geeska furka casaanka ah.**

**Fadlan ha ku taabanin afka hore ee suufka caddaanka ah meel kaste xilliga aad qaadeyso muunadaha. Haddii aad suufka ku taabato meesha ay ahaatoba xilli kaste inta la qaadaayo muunada, fadlan codso in lagu siiyo sanduuq cusub.**




**4**

Si toos ah uu qabso suufka marka aad gelayso amaba aad ka soo saareyso suufka xubinka taranka. Adigoo ku haaya gacantaada kale, si dabacsan maqaarka ku yaalla dibedda xubinka taranka. Geli afka hore ee suufka afka hore ee xubinka taranka. Ujeedi afka hore ee suufka oo geli qaybta hoose ee xubinkaaga taranka adigoo dabcinayaa murqahaaga.




**5**



Geli suufka xubinkaaga taranka sida lagu muuqata. Haddii uu suufka si fudud uu ku geli waayo, si dabacsan uu wareeji adigoo gelayaa. Haddii ay farahaaga saaran yihiin khadka cas, waxey tani ka hor istaagaysaa inaad meel dheer gaarsiisid. Haddii ay kugu adkaato, ha isku dayin inaad si qasab ah aad sidaasi ku sameyso oo aad sii wado.

**6**



Wareeji suufka muddo uu dhaxeysa 10 ilaa iyo 30 ilbiriqsi, adigoo hubinayaa inuu suufka taabtay dhinacyada xubinka taranka, kadibna si taxadar leh uu soo saarayaa suufka.

**7**


Si taxadar leh uu geli suufka tuubada lagu rido.

Adigoo sanduuqa u qabanaya si xog leh, ka qaad qoriga khadka cas. Ka tuur qoriga qaybta dambe ee suufka, oo lahar oo keliya qaybta dambe ee suufka.



**8**

Dib ugu xir oo adkeey furka sanduuqa lagu qaadaayo muunadaha.



Hadda waxaad diyaar uu tahay inaad dib ugu celiso suufka xirfadlaha ku siiyo daryeelka caafimaad. Iyaga ayaa dhamaystiri doona habraaca loo baahan yahay ee la xiriira muunadahaaga ka hor inta aan loo dirin baaritaan.

Dib ugu celi sanduuqa suufka lagu qaadaayo muunadaha, baqshada muunadaha, sumadda muunadda iyo warqadda tilmaanta xirfadlaha ku siiyo daryeelkaaga caafimaad.



Si aad u eegto tilmaamahan kuwaas oo lagu heli karo luqado kale, fadlan booqo

[www.hslpathology.com/cervical-screening-self-collection](http://www.hslpathology.com/cervical-screening-self-collection)

© Shirkadda The Doctors Laboratory Limited, 2025.

Sawirrada waxaa xuquuqdooda leh: © Jag Matharu/Thin Air Productions

TAP5692B-SOMALI/04-08-25/V8